

Warqadda Ballanta loogu talagalay Qeybta Taageerada Ilmaha (DCs) Go'aaminta Sababta Sharci

Appointment Letter for Division of Child Support (DCS) Good Cause Determination

Taariikh:

Lambarka Macmiilka:

Ku:

Gacaliye(so)

Adigu waxaad weydiisatay Sabab Sharci oo aad u sheegtay Xafiiska Adeegyada Beesha ee xaafaddaada inaad karti u lahayn inaad ka caawiso Qaybta Taakulaynta Ilmaha (DCS), sidii ay u soo ururin lahaayeen taageerada ilmaha iyo/ama caafimaadka. DCS waxay bixisaa adeegyada meelmarinta taageerada dhammeystiran marka aad heshid TANF. Adeegyada waxaa ka mid noqon kara caddaynta aabbanimo, xereynta iyo/ama meelmarinta amarka taageero, meelmarinta waajibada ee bixinta caymis caafimaad iyo ururinta qaybtiisa/qaybteeda ee kharashaadyada caymiska caafimaad ee loogu talagalay carruurtaada waalidka kale inuu bixiyo caymiska caafimaad. Anigu waxaan inoo qabtay ballanta soo socda si aan adiga kaagala hadlo codsigaaga Sababta Sharci ee lagu joojinayo talaabooyinka taageerada ilmaha iyo/ama taageerada caafimaadka

Anigu waxaan inoo qabtay ballanta soo socda si aan adiga kaagala hadlo codsigaaga Sababta Sharci ee lagu joojinayo talaabooyinka taageerada ilmaha iyo/ama taageerada caafimaadka.

CINWAAN

TAARIIKH

WAQTI

Haddii aadan iman karin, fadlan iga soo wac _____ illaa _____. **Haddii aadan soo wicin ama aadan iman ballanta, anigu waxa dhici karta inaan diido weydiisaigaa Sababta Sharci ah.**

Anigu waan ansixin doonaa codsiga Sababta Sharci ah haddii la go'aamiyo in:

- Adiga oo cabsi ka qaba in adiga ama ilmahaaga/carruurta aad daryeesho aad si daran waxyeello jir ama shucuur ahaan idinku timaad.
- Ilmahaaga oo ku dhashay sabab kusfi ama isku-tag geyitaan la'aan (incest).
- Adiga oo bilaabay qaabsocodka ilmo korsasho, ama aad adigu kula jirto la-talin (illaa saddex bilood) hay'ad meeleyn ilmo arrimaha ku saabsan korsashada.

Marka la isku yimaad ballanta, waxaad saxeexi kartaa kelmado sifeynaya waxayaabaha aad ka welweleyso ama ka cabsaneyso. Waxa kale oo aad adigu keeni kartaa macluumaad kale oo taageeraya codsigaaga, haddii ay jiraan. Tusaalooyinka qaarkooda waxaa ka mid ah:

- Warbxinta(maha) bileyska;
- Warbxinta(maha) caafimaadka;
- Warbxinta(maha) maxkamadda;
- Amarka xaddidaadda Shaqaaqada Guriga;
- Kelmado qoran oo ka socda wadaad, asxaabta, ehelada, jaarka, dadka la wad shaqeyo kuwaas oo sifeynaya khatarta;
- Waraaq ka socota gabaad(yada) shaqaaqada guriga; ama
- Waraaq ka socota la-taliye(yaasha) shaqaaqada guriga.

Maxaa dhici doona markay tahay ballantay?

- Adiga ayaa karti u yeelan kara inaad sharaxdo sababta aad uga cabsaneyso inay u soo ururinta taageerada ilmaha iyo caafimaadka waxyeello u horsseedi karto adiga iyo ilmahaagaba (carruurtaadaba).
- Waxaan ka wadli karnaa caawimada kale ee aad laga yaabo ugu baahan tahay inaad ammaan ahaato.

Maxaad dhici doonaa haddii aadan bixin kelmado saxeexam ama macluumaad kale sidii aad u tusi lahayd sababta aad uga cabsaneyso inay u soo ururinta taageerada ilmaha iyo caafimaadka waxyeello u horsseedi karto adiga iyo ilmahaagaba (carruurtaadaba)?

- Waxa laga yaabaa in lagu diido haddii aan go'aamino inayana sabab(ha) la bixiyay qancineyn shuruudaha loo bixiyo Sababta Sharci ah.
- Keeskaaga waxaa loo diri doonaa DCS si loo furo dacwad taakulayn ilmo ee loogu talagalay adeegyada meelmarinta taakulayn dhammeystiran.
- Waxa laga yaabaa inuu u-doodaha shaqaaqada guri ee ka tirsan Xafiiska Adeegyada Beesha (CSO) deegaankaaga ama beeshaada ayaa dhici karta inuu diyaar yahay inuu kaala qayb-qaato kulankan. Wixii faahfaahin dheeraad ah kala xiriir Xafiiska Adeegyada Beesha (CSO) deegaankaaga.

Maxaa dhacaya haddii aadan oggolaan go'aankayaga?

1. Waxaad u wici kartaa Xafiiska Adeegyada Beeshaada, ama u qori kartaa The Office of Administrative Hearings, PO Box 42489, Olympia WA 98504-2489 gudahooda 90 maalmood si aad u weydiisato dhageysi. Haddii aad weydiisato dhageysi, DCS ma bilaabi doonto ka shaqeynta keeskaaga illaa go'aanka dhageysiga la gaaro. Looyar ama qof kale ayaa wakiil adiga kuu noqon kara, ama adiga ayaa wakiil iska noqon kara.
2. Dib u cesho weydiisigaaga loogu talagalay caawimada TANF. Hase yeeshee, DCS ayaa laga yaabaa inay ka shaqeyso keeskaaga waqtiga adigu aad heshay TANF.
3. Ku sii wado helitaanka caawimada oo haka qaybqaado hawlaha fulinta taageerada. Hase yeeshee, haddii aadan ka qayb qaadan hawlaha fulinta taageerada DCS ayaa sii wadi doonta inay ka shaqeyso keeskaaga oo waxa laga yaabaa in la naaquso illaa 25% haddii la diido weydiisigaaga Sababta Sharci. Looyar ama qof kale oo aad doorato ayaa wakiil kaaga noqon kara dhageysiga, ama adiga ayaa wakiil iska noqon kara.

Ma heli kartaa adigu la-talin sharci ama wakiil in lagaa noqodo?

Waxaad uga wici kartaa khadka adeegyada sharci ee dhammaan gobol taleefanka 1-888-201-1014.